

COVID-19 - Macluumaadka caafimaadka iyo badbaadada shaqada ee meesha shaqada

Warqadan xaqiiqdu waxay kaa caawin doontaa inaad ka dhigtid meeshaada shaqada COVID-19 aamin. Macluumaadka kale ee COVID-19 oo luugadaada ku qoran [COVID-19 Information in your language](#) ayaa sidoo kale la heli karaa.

Shuruucda Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada waxay kaaga baahan yihiin inaad daryeeshid caafimaadka, badbaadada iyo daryeelka shaqaalahaaga iyo dadka kale ee meesha shaqada, oo ay kujiraan adiga, shaqaalahaaga, qandaraasleyaasha, macaamiisha iyo booqdayaasha. Waa inaad baabi'isaa ama yaraysid khataraha caafimaadka iyo badbaadada illaa iyo intii suurtagal ah. Waa sharciga.

Qorshee iyo wada xidhiidhka

Waa inaad maamushaa halista soo-gaadhista COVID-19 ee meesha shaqada. Si aad uga ilaalisid shaqaalaha badbaadada waxaad u baahan tahay qorshe meesha shaqada oo ay ka mid yihiin kala fogaanta jirka, fayadhowarka iyo nadaafadda

Si loo hubiyo in qorshahaagu yahay mid wax ku ool ah waa inaad sidoo kale:

- La soco xogta ugu dambeysey ee laga helo ilo sumcad leh. Tilmaamaha caafimaadka ([Public health directions](#)) dadweynaha ee dowlad-goboleedkaaga ama taritorigaaga waxaa ku jira xeerar ku saabsan xaddididda iyo shuruudaha nooca ganacsigaaga.
- Isu diyaari waxaad samayn lahayd haddii COVID ka jiro meeshaada shaqada.
- Tixgeli halista cusub ee ka dhalatay isbedelada sida aad u shaqeysid (tusaale ahaan, gardarrada macaamiisha, ama shaqaalaha oo go'doon ah).
- La hadal shaqaalahaaga oo ka fikir waxyaabaha ay ka walwalaan.
- Tababar shaqaalaha oo hubi in qof walbaa ogyahay waxa la sameeyo.
- Calaamado iyo sawirro ([signs and posters](#)) kor u dhig calaamadaha si aad dadka ugu xusuusiso halista COVID-19 iyo sida loo joojiyo fiditaanka.

Jooji faafitaanka COVID-19

- Adiga iyo shaqaalahaaguba waa inaad guriga joojtaan haddii aad xannuunsatid (xumad, qufac, cune xanuun iyo neefsashada oo gaaban).

- Xaqiiji in dadku ay ku haysan karaan ugu yaraan 1,5 mitir kala fogaansha jireed.
- Ku dhiirrigali shaqaalaha in ay si isdaba joog ah gacmaha ugu meydhaan ugu yaraan 20 sekan iyo saabuun iyo biyo ama ay isticmaalaan gacma nadiifiye alkolo oo ku saleysan.
- Ku dhiiri geli shaqaalaha inay ku dhaqmaan nadaafadda wanaagsan oo ku qufacaan ama ku hindhisaan gacantooda.
- Hubso in meesha shaqada si joogto ah loo nadiifiyo oo jeermis loo dilo. Nadiifi meelaha dusha ka taabtay marar badan.
- U hel qalab difaac shaqsiyeed (sida galoofyada iyo waji gashiga) shaqaalaha haddii ay u baahdaan. Bar iyaga sida loo isticmaalo.

Dib u eegis

- Si joogto ah dib ugu eeg qorshahaaga si aad u hubisid inuu shaqeynayo oo shaqaalaha ka fogeyn doono COVID-19.
- Haddii ay jiraan khataro cusub oo soo baxay, ka fikir haddii aad u baahan tahay inaad meel dhigtid wax tallaabooyin dheeri ah.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan COVID-19 iyo caafimaadka iyo badbaadada shaqada, waxaad gashaa websaydhka [Safe Work Australia website](#).

Warqada dhabta ah ee dheeri ah ee ku saabsan caafimaadka shaqada iyo badbaadada, waxaad u tagtaa [COVID-19 Information in your language website](#). Macluumaadka COVID-19 ee boggaaga luuqadda.

Wixii macluumaad caafimaad ah, gal [health.gov.au](#).

Macluumaadka khaaska ah ee meeshaada shaqada fadlan la xidhiidha kuxidhiyaha WHS ee ku habboon dowlad-goboleedkaaga ama taritorigaaga ([WHS regulator in your state or territory](#)).